

Waxaa MHO la aasaasey 1981 si urur guriyeyn oo samafal eheen si loo bixiyo guryo la lahaan karo oo qiimo jaban waxuuna ilaa iminka ku caawiyay dad kor u dhaafaayo 26,000 inay iskood u yeeshaan guryo. 2003 waxaan qayb ka noqonay Metropolitan Housing Trust (oo ah ganacsi uu leeyahay Metropolitan Housing Partnership), oo ah shirkad samafal ah.

Waxay **ujeeddadeenu** tahay:

Inaan abuurno oo aan suuq-gayno adeegyo guriyeyn oo la awoodi karo, badeecadaha iyo kala doorashada guryo loogu talagalay reerada lacagta yar iyo meel-dhexaad ah qaato.

Qiimaha

Waxaan rumaysan nahay:

- In la siiyo guryo iyo adeegyo tayo fiican leh kuwa doonaayo inay qayb ka yeeshaan guryahooda
- In la dhiso ama la siiyo guryo ay dadka doonayaan inay ku noolaadaan sidaasina ku biiraayo gacan ku haynta iyo soo jiidashada bay'adda
- In awood loo siiyo dadka aan u adeegno inay sida ay doonayaan uga qayb-qaataan adeegyada aan siino iyo maaraynta gurigooda iyo jaalliyadda
- In loo la shaqeeyo si lamaanimo ah MHP iyo degganayaasheeda si loo sameeyo guriyeyn ka sii fiican iyo jaalliyado ka sii xooggan
- In ganacsi ahaan loo guulaysto si faa'iidada oo aan abuurno ay si wax ku ool ah dib loogu maalgeliyo si isdaba joog ahna loogu si hagaajiyo qiimahayna ganacsi bulshadeed ahaan.
- In la dhiirigeliyo xalalka hal-abuurka ah ee hawl-wadeenada, macaamiisha iyo dadka ay khuseeydo si hagaajinta ganacsigeena iyo si hagaajinta tayada nolosha jaalliyadaha aan u shaqayno
- In la abuurto jaalliyado dhaqan ahaan kala duwan oo dulqaad leh iyo gobo shaqo oo ay dadka asal ahaantooda kala jinsiga ah ay awoodaan laguna dhiirigeliyo inay sameeyaan horumar
- In la qiimeeyo lana horumariyo hawl-wadeenadeena bacdamaa ay u yahiin furaha hantida ururka.

Waxaan taageernaa ujeeddada MHP:

- **"In lala shaqeeyo degganayaasha si ay u helaan guryo ka sii fiican iyo jaalliyado ka sii xooggan"**

Waxaa shabakaddaan loogu talagalay in lagugu caawiyo in aad wax intaa ka badan ee nagu saabsan u ogaatid, in lagugu caawiyo helitaanka badeecooyinka iyo adeegyada oo aan bixino iyo in lagugu dhiirigeliyo inaad nala qayb-qaadatid adiga oo na soo siinaayo warcelin iyo ka qayb-gelaayo kooxoyinka diirad-saarka ah si ay inooga caawiyaan sii hagaajinta habka aan kuu caawino.

Haddii aad u baahan tahay in macluumaadka ku qoran shabakaddaan lagu tujimo ama loo qaabeeyo hab kale (tusaale ahaan, farta indhoolaha Braille), fadlan nagala soo xiriir applications&enquiries@mht.co.uk ama soo wac 020 8920 7777 ama 020 8920 7740.